Ka warbixinta Shakiga & hawsha Dembiga

Xafiiska Xaafiada ee Ka qayb qaadashada Barnaamijka ka Hortagga Dembiga
(Office of Neighborhood Involvement Crime Prevention Program)
La cusboonaysiiya Xagaaga 2017

Hawsha shakiga leh waa **dhaqan kasta** oo sababa digniin. *Dhaqanku waa* waxa ka dhiga hawlaha qofka kuwa shaki leh, **maaha** muuqaalkooda, sinjiga, isirka, diinta ama asalka qaranka. Faahfaahinta sida sinjiga iyo muuqaalka waxay muhiim u ahaan doontaa in loo gudbiyo booliska si loogu fahafaahiyo dadka(qofka) ku hawlan hawsha shakiga leh, laakiin waa in loo isticmaalaa si aasaaska go'aanminta haddii shay uu shaki leeyahay. Waxaanu ku dhiirigelinaynaa dadka degen inay yeeshaan digtooni caafmaad leh oo deegaankooda ah oo ay ogsoonaadaan waxa ka dhacaya hareerahooda oo ka jawaabaan kuwa ishaaraya ee sheegaya dhibaatada ama suuragal ahaanshaha mid. Haddii jawaabta shakhsiyaad ay ku salaysantahay eex, waxay si aan sax ahayn u qiimayn doonaan waxay tahay khatarta, iska dhega marinta ishaarada kale ee deegaankooda taas oo dhab ahaan sheegaysa dhibaato ay garowsanayaan. Samee wanaagaaga si aad u garato eexdaada oo xooga saarka dhaqanka. Waxay oggolaan doontaa in fahamkaagu uu soo saaro marka aad u baahantahay.

Marka aad taqaano jaarkaaga, waxaad ogsoonaataa cidda ku nool guriga ama qaybaha dabaqa ee kuu dhow, baabuurta iyo baaskiiladaha ay kaxaystaan, dadka lugaynaya iyo habka caadiga ah ee xaafada. Iyaddoo sababtu tahay garashadaada, waxaad si diyaar ah u aqoonsan kartaa hawsha shakiga leh, waxaad uga warbixin kartaaa booliska oo waxaad u sheegi kartaa jaarkaaga inay gartaan waxa dhacay. Ilaalada xaafada waxay kaa dhigi kartaa inaad barato jaarkaaga oo aad dhisto laymanka wada xidhiidhka.

Kuwan soo socdaa waa tusalaooyinka jaarka ka jawaabaya hawsha shakiga leh.

- 3:00 subaxnimo haweenay ayaa waxay aragtay gaadhi ag dhiganaya xaga guriga jaarka ah ee qofka duqda ah lahaa. Nin ayaa ka tagay gaadhiga oo ku qarsoomay dhinaca marka ninka labbaad uu sii joogay gaadhiga isagoo nalku densanyahay oo matoorka baabuurkuna daaranyahay. Haweenaydu waxay wacday 9-1-1 oo boolisku waxa uu qabtay ninka koowaad oo jabsanaya kaalinta shidaalka sekeda ku xigta.
- Goor hore oo subax Axada ah, qof jaar aha waxa uu ogaaday ninka soconaya jidka oo eegaya baabuurta oo ka dib waxa uu maqlay muraayad jabtay ilbidhiqsiyo ka dib. Jaarku waxa uu wacay 9-1-1 oo boolisku waxay xidheen ninka oo sida dhowr rikoodhada baabuurta oo laga soo xaday dhowr seked ka hor.
- Haweenay ayaa aragtay nin dhalin yar oo garaacaya albaabka hore ee jaarkeeda. Marka qof aanu ka jawaabin, waxa uu socda wareega dhinaca guriga. Waxay si degdeg ah u wacday 9-1-1 oo ninka waxaa loo xidhay jabsiga guriga.

Waxa la raadinayo

Qayb hawl shaki le ah uma caddaan karto sida tusaalooyinkii hore. Intaa waxa dheer, waxa looga fekero wax shaki leh hal seked waxa uu noqon karaa dhicitaan caadi ah mid kale. Marka hawsha aad arkaysaa anaay caadi u ahayn jidka aad degentahay, soo wac booliska. Tusaalooyinka kale ee hawsha shakiga leh waxaa ka mid ah:

Hawl Shaki leh	***Waxa laga yaabo inuu dhacayo***
Baabuur si fudud u socda oo aan nal lahayn.	Suuragla ahaan sahaminaya jaarka.
Qof ka furanya qaybaha baabuurka ama qalabka ku xidhan baabuurka.	Tuuganimo suuragal ah ama burburin hanti oo socota.

Si loo abaabulo taageerada iskaashiyada bulshadda si looga hortaggo dembiga iyo baqdinta dembiga.

4747 E. Burnside
Portland, Oregon 97215

telefoonka 503-823-4064
Fagaska 503-823-2909
tty 503-823-6969

Warqaddan waxaa laga heli karaa
Ka hortagga Dembiga
Websaydka barnaamijka
www.portlandoregon.gov/oni/cp

office of neighborhood involvement

Hawl Shaki leh	*Waxa laga yaabo inuu dhacayo*
Qof ku raraya alaab qiime leh baabuur ag yaala ganacsi xdhan ama guri aan lagu jirin	Guri jabsi suuragal ah oo socda
Qof isku deyaya inuu si xoog ah u galo baabuur qufulan.	Jebinta suuragalka ah ee baabuur daaqad ama tuuganimo socota.
Qof xoog lagu saarayo baabuur.	Af duub suuragal ah, weerar, isku day weerar galmo, dagaalka guriga.
Iska meeraysiga horta guriga ama gancsiga, gaar ahaan goob aan lagu jirin.	Guri jabsi suuragal ah
Qofka la baxsanaya alaab qiima leh, waxaa looga jeedaa, TV, riikoodh	Qofka laga shakisanyahay ee suuragalka ah ee ka baxsanaya goobta tuugada.
Codka dagaalka ---- qaylin cabaadis, codka kuraasa ama dhalooyin jabaya.	Weerar xad gudub dagaal guri oo suuragal ah, weerarka galmada.
Dadka alaabta ku iibinaya qiime ka jaban qiimaha suuqa.	Suuragal ahaan isku deyaya iibka alaabta la xaday.
Dadka la imanaya albaabkaaga codsiyo aan caadi ahayn, sida lacagta gaaska ama qofka sameeya qufulada, ama waydiisanaya deeqaha samafalka isagoon sida aqoonsi sax ah ama agab.	Khiyaamo suuragal ah ama sahminta guriga ama iskudeyaya soo gelida budhcadnimo ah.

Wicitaanka booliska

Haddii fahankaagu kuu sheego inaanu wax saxnayn ku saabsan hawsha aad arkayso, wac 9-1-1 ama lambarka booliska aan gurmadka ah (503-823-3333). Way wanaagsantahay in shaaca laga qaado in aanu waxba khaldanayn halkii laga oggolaan lahaa dembi inuu dhaco.

Marka la soo wacayo 911

Wac 911 marka ay jirto khatar degdeg ah oo nolosha ah ama dhismaha ama dembi socdo. Marka laga wacaya 9-1-1 ee telfoonka moobilka Degmadda Multnomah, waxaa lagu fari doonaa inaad cadaadiso furaha ama tidhaahdo “911” ka dib maqalka fariin kooban oo duuban. Haddii aanad soo jawaabin sagaal ilbidhiqsi ka dib, wicitaanku wuu dhamaadaa. Tallaabada dheeraadka waa lama huraan sababtoo ah waxaa jira wicitaan badan oo aan loogu talo galin oo ay sababto is garaaca telefoonka oo jeebka ku jira. Had iyo jeer waxa la door bidaa inaad wacdo 9-1-1 si aad u waydiisato jawaabta degdeg ah. Si kastaba ha ahaatee, kumaa gelaya khatar wayn ku hadalka telefoonka ama dadka dhegoolaha ah, uu maqalku ku adag yahay ama leh awoodaha la hadalka xadidan waxa uu fariin u soo qori karaa 9-1-1.

Maxaa dhacaya markaad wacdo 911

Markaad wacdo 911, qabtaha wicitaanku waxa uu waydiin karaa su’aalo taxana ah sida:

- Waa maxay gurmadku? (bixi cinwaanka, calaamadaha jidhka, magacyada wadooyinka)
- Maxaa dhacaya? Sharax dadka laga shakisanyahay, baabuurta iyo falalka aad arkayso. Ha ogaadaan haddii dad laga shakisanyahay ay weli joogaan. Haddii aanay jirin, goorma markii u dambaysay la arkay oo dhankay u jeedeen?
- Waa maxay magacaaga iyo lambarka aad ka soo wacayso? Fadlan ha u malayn in qofka qabanaya wicitaanku inuu ku hayo macluumaadka xidhiidhka kombuyuutarka.

Qofka qabanaya wicitaanku ha u waydiiyo su’aalo qaabka lama huraanka ah Soo gaabi jawaabahaaga oo sax ha ahaadaan sida suuragalka ah. Dhammaan xaqiiqooyinka waa in la xaqiijiyaa si loo hubiyo in gurmadka loo qabto sida ugu degdeg badan ee suuragalka ah.

Barnaamijka Ka hortaga Dembiga ee Magaalada Portland

Barnaamijkayagu waxa uu bixiyaa talo, abaabulaa oo tababaraa dadka degen Portland iyo ganacsiyada waxa ku saabsan arrimaha dembiga. Si aad ula xidhiidho Isu duwaha Barnaamijka Ka hortaga Dembiga ee xaafadaada Portland:

- Wac 503-823-4064
- Iimaulka onicpa@portlandoregon.gov

Ka codso tababarka www.portlandoregon.gov/oni/70447.

Sababta aad khadka ugu jirayso

Marka aad telefoonka kula hadlayso qabtaha wicitaanka, isaga ama iyaddu waxa uu u diraa macluumaadkaaga qofka cid u diraha meesha, kaas oo macluumaadka ugu gudbiya si toos ah booliska. Ku jirida khadka telefoonka iyo uga jawaabida su'aalaha qabtaha wicitaanka ma daahiso jawaabta booliska. Nidaamku waa uu u oggolaadaa boolisku inu helo macluumaadka lama huraanka ah si uu u hubiyo badbaadada iyo jawaabta wax ku oolka ah. Haddii ay suuragal tahay, telefoonka ha dhigin ilaa qabtaha wicitaanka uu ku faro inaad sidaas samayso.

Maxaad samayn lahayd haddii lambarada telefoonku ay mashquul yihiin?

Haddii aad wacdo 911 oo aad gaadho hadalka duuban oo sheegaya in dhammaan laymanku ay mashquul yihiin. Wicitaankaaga waxaa looga jawaabi doonaa sida degdeg a ee suuragalka ah. Haddii aad dhigto oo aad dib u soo garaacdo, waxaad waayi doontaa meeshaada laynka.

Marka la wacayo lambarka aan gurmadka ahayn

Gudaha Portland, waxaad la soo xidhiidhi kartaa 503-823-3333 wixii ah caawimada booliska aan gurmadka ahayn. Isticmaal lambarka laynka aan gurmadka ahayn ee falalka shakiga leh ee aan ahayn halis degdeg ah oo nolosha ah ama dhismaha ama in laga warbixiyo dembiga hadda ka hor dhacay iyo in qofkii laga shakisanaa uu tagay. Qabtayaasha hadalka oo isku mid ah kuwaas oo ka jawaaba qaybaha wicitaanada 9-1-1 ee laynkan telefoonka. Isticmaalka lambarka aan gurmadka ahayn waxa uu u diyaariyaa telefoonada 9-1-1 gurmadyada dhabta ah. Iyaddoo ku xidhan cidhiidhiga labba lambar, wicitaankaaga waxaa loo qaadi karaa si degdeg ah ama waxaad u baahan kartaa inaad sugto qabtaha wicitaanka labbaad ee la heli karo. Marka aanad garanayn haddii aad wacdo 9-1-1 ama lambarka aan gurmadka ahayn, ku bilow 9-1-1. Xaaladaha qaarkood, qabtayaasha wicitaanka waxay ku fari karaan inaad dhigto oo aad wacdo lambarka aan gurmadka ahayn.

Tusaalooyinka qaarkood markaad soo wacayso 503-823-3333 waa:

- Markaad eegto xaga hore ee daaqada, waxaad aragtaa daaqada baabuurta la dhigay jidka.
- Gurigaad ku soo noqotaa oo shaqa ka soo noqotaa oo waxaad heshay qof inuu xaday qalabkii lagu jarayay dooga ee yaalay xeradaada wakhti maalinimada ah. Dembiyada qaarkood, sida tuugada meel dad waynahu geli karo,Waxaad soo gudbin kartaa onlayn ahaan www.portlandoregon.gov/police/cor.

Marka aan la soo wacayn lambarna

Inta badan dadku waxay soo wacaan lambarka gurmadka haddii ay doonayaan inay wax badan ka ogyhiin xaaladaha jidka, ka warbixi dhibaato xawayaanka ah oo aan ku lug lahayn xawayaan bahal ah, ka warbixi nalka oo go'a, ama dhibaato ku qabka helida lambarka telefoonka. Codsiyadan ama waydiimaha ganacsiga kale ee caadiga ah, waa inaanad haysan lambarka gurmadka ah lambar aan gurmad ahayn. Haddii aad hayso cabasho ama su'aal ku saabsan adeega ay bixisay Magaalada Portland ama Degmadda Multnomah, wac Macluumaadka Magaalada/Degmadda iyo Laynka Gudbinta ee 503-823-4000.

Haddii ay jirto dhibaato joogta ah oo dembi goob Portland ah, wax ka qor falalka, wakhtiyada iyo saraakiisha iyo wakiilada wakaalada kale ee aad la hadashay. Sidoo kale waxaad la xidhiidhi karta Isu duwaha Barnaamijkaaga Ka hortagga Dembiga ee talada ku saabsan waxa marka labbaad la samaynayo.

Isticmaal Erayada Saxda ah

Marka la wacayo 9-1-1, isticmaal erayada saxda ama marka la sharaxayo baadhitaanada. Si loo yidhaahdo "Waa la i dhacay" marka dhibanau guri jabsiga ay saamayn karto sida boolisku ku jawaabo. Ka eeg qeexitaanka midigta.

Sharaxaada qofka laga shakisanyahay, baabuurka, ama falka

Markaad wacdo caawimada booliska, sida aad u sharaxdo waxaad aragtay waxay u oggolaataa sarkaalka(kiisha) jawaabaya inay gaar ahaan gartaan waxay raadinayaan iyo halka laga raadinayo. Sharax hal qofka laga shakisanahay wakhtigiiba madax ilaa minjo. Jaantuuska bogga soo socdaa waxa uu bixinayaa tusaalooyinka sifooyinka la oggaanayo.

Eraygada; Hawsha Dembiga
Weerrka: Sababaya dhaawac ama isku deyaya inuu dhawac u gaysto qof kale.
Jabsashada guriga: Si sharci darro ku gelida guriga, ganacsiga ama dhismaha oo ay ujeedadu tahay in wax la xado ama dembi kale.
Budhcadnimada: Xoog ku qaadashada hantida ku kale, hanjabaad xoog ama baqdin gelinta dhibanaha isagoo ka baqanaya waxyeelo degdeg ah tusaale hub ku boob qof, shandad ka dhufasho.
Jabsashada Baabuur (wax ka xadista baabuurka)**:** Xadaya waxa ku jira ama biraha baaburrka ku jira — maaha xadista baabuurka.
Larceny (xadista alaabta qofka) (eray kale oo loo isticmaalo **Xiidtaanka**)**:** Xadista hantida aan ka ahayn guri jabsiga ama budhcadnimada tusaale, jeebka ka xadis, dukaan ka xadis, xaditaanka baaskiilka, ama baabuur jabsi.
Weerarka galmada Lagu khasbay ama hawl galmo aan la isla oggolaan uu mid ku sameeyo mid kale.
Burbirinta dhisme Burburinta ama fool xumaynta dhisme.
Ku xad gudubka dhul ama dhisme Gelaya ama ku hadhaya dhismaha isagoon oggolaansha ka haysan mulkiilaha.
Sahamin: Baadhitaanka ama xog ka qaadita aaga si uu u qorsheeyo dembi.

Jaantuuska Aqoonsiga Qofka laga shakisanyahay



Maxaa u gaar ah ah qofkan?
Aqoonsadaha ugu fiican waa kuwa u gaarka ah qofka laga shakisanyahay oo si fudud looma beddeli karo sida calaamada nabar bogsaday, taatuuga iyo sifooyinka wajiga.

Fiirooyinka

Jaantuuska Aqoonsiga Baabuurka

Qofka laga shakisanyahay ma gaadhi ayuu wadaa mise wuu lugaynayaa, mooto, baaskiilada. Qoraal samee



Fiirooyinka

* *Macluumaadka ku yaala lambarka baabuurka waa faahfaahinta ugu caawimada badan ee la xusuuto.*